



Ku Soo Dhawow Regional Women's Enterprise Unit

Ku soo dhawow Unugga Ganacsiga Haweenka ee West Midlands (West Midlands Regional Women's Enterprise Unit) (RWEU) – ee la dhisay Bishii Shanaad ee 2006. Ulajeedada RWEU waxa weeye in la kordhiyo tirada haweenka ganacsatada ah ee ka jirta gobolka.

Waxa aanu rabnaa in aanu kaa gargaarno sidii aad u gaadhi lahayd riyadaada ku saabsan bilaabista ganacsi aad gaar u leedahay, ama hamigaaga ah in aad kobcisid oo aad horumarisid ganacsi imminka jira.

Waxa aad heli karta tiro ah la-talin ganacsi, taageero iyo tababar bilaash ah oo ay bixinayaan khubarada joogta Hay'adda Horumarinta Ganacsiga Haweenka (Women's Business Development Agency) (WBDA) ama Haweenka ku Jira Ganacsi Miyi ah (Women in Rural Enterprise) (WiRE), kuwaaso ah hay'ado shuraako ku ah horumarinta RWEU ee cusub.

Adeeggu ma aha mid ku xidhan waayo-aragnimo, dhaqaale ama taariikh waxbarasho, da', sinji, awood ama awood-dari – in alaale intii aad rabtid in aad bilawdid oo aad kobcisid ganacsigaaga... waxa aanu halkan u joognaa in aanu ku gargaarno!

Waxa RWEU qayb ahaan maalgaliyay Hay'adda Horumarinta Gobolka (Advantage West Midlands), oo ah Adeegga Ganacsiyada Yaryar ee Dti (Dti's Small Business Service) iyo Sanduuqa Bulshada ee Yurub (European Social Fund).

Waxa aanu bixino

Ma tahay haweenay ku fikiraysa inay bilawdo ganacsi u gaar ah, laakiin aan garanaynin meesha ay wax ka bilaabi lahayd?

Waxa laga yaabaa in aad imminkaba leedahay ganacsi oo aad rabtid in aad ganacsigaaga gaadhsiisid heerka ku xiga, ama waxa laga yaabaa in aad u baahan in lagaala taliyo xagga qaadashada iyo maamulista shaqaale?

Nooc kasta ha ahaato baahidaadu, waxa aanu haweenka ku fikiraya bilaabista ganacsi u gaar ah, ama hore u bilaabay ganacsi u gaar ah, siinaa taageero bilaash ah oo kala duwan oo ay ku jiraan:

- Dhisidda isku-kalsoonida iyo soo-saaridda fikrado iyo barnaamijyo ganacsi
- Tababar ah farsamooyinka ganacsiga/baro sida la isugu duwo qorshahaaga ganacsi
- La-talin ganacsi oo fool-ka-fool ah min ka hor bilaabista ilaa bilaabista ganacsiga
- La-talin ganacsi oo fool-ka-fool ah oo la siinayo ganacsiyada jira
- Barnaamijyo taageero oo loogu talagalay haweenka ee suurogal ahaan leh awood kobcin ganacsi oo sareysa
- La-xidhiidhista kooxaha iskaashiga ganacsi ee haweenka
- La-kulanka haween ku-dayasho iyo yididiloo-galin leh

Waxa kale oo aanu leenahay barnaamij 'bilaabis ganacsi' oo ah 12 maalmood (oo loogu talagalay haweenka haysta Oggalaansho Qaxooti oo Buuxa (Full Refugee Status), Badbaadin Bini'aadan (Humanitarian Protection) ama Oggalaansho Ku-meel-gaadhsiis ah (Discretionary Leave)

- In la hormariyo farsamooyin nololeed si loo xoojiyo isku-kalsoonida, dhiiranaanta iyo rabitaanka
- In la hagaajiyo farsamooyinkaaga isgaadhsiinta si ay kaaga gargaaraan nolosha iyo shaqada
- In aad baratid sidii aad u soo saari lahayd fikrado ganacsi oo suurogal ah oo kuu gaar ah
- In aad baratid sida la isugu duwo qorshahaaga ganacsi
- In aad hagaajisid farsamooyinkaaga Ingiriisiga ee nolosha iyo shaqada
- Waxa gargaar dhaqaale loo heli karaa kharashyada daryeelka ilmaha iyo safarka
- *Si aad boos uga qabsatid barnaamijkan gaarka ah wac 02476 236 111*

Nala soo xidhiidh

Heer kasta oo aad ka maraysid qorsheynta ganacsiga ama habka horumarinta ganacsiga, waxa aanu halkan u joognaa in aanu kaa gargaarno sidii aad fikradaha ganacsigaaga iyo hamigaaga uga dhigi lahayd kuwo dhabooba, sidaa daraadeed fadlan naga soo wac mid ka mid ah labadayada Xafiis Goboleed ee hoos ku yaala (Isniin ilaa Jimce min 9:00 ilaa 17:30).

- Haddii aad joogtid aag magaalo ah (magaalo), fadlan naga soo wac 02476 236 111 (Women's Business Development Agency)
- Haddii aad joogtid aag miyi ah (tuulo), fadlan naga so wac 01952 815 319 (Women in Rural Enterprise)

Haddii wax mugdiyi kaa jiro, fadlan labadaa xafiis mid wac waxana hubaal ah in aanu ku gargaari doono. Waxa kale oo aad nagu soo booqan kartaa internetka barta www.rweu.co.uk.

Fadlan la soco

Haddii aad jeceshahay in aad ganacsiga ku guulaysatid gudaha Boqortooyada Midowday waxa lagama-maarmaan ah in aqoon fiican aad u leedahay Afka Ingiriisiga.

Dhamaan adeegyada iyo alaabta waxbarashada ee Unugga Ganacsiga ee Haweenka ee Gobolka (Regional Women's Enterprise Unit) waxa lagu bixiyaa Ingiriisi, sidaa daraadeed waxa aad u baahan doontaa aqoon ugu yaraan ah Heerka Saddexaad ee Ingiriisiga Af Labaad Ahaan (ESOL Entry Level 3).

Cidda na maalgalisay

Waxa RWEU qayb ahaan maalgaliyay:

